MANCHESTER
1824
The University of Manchester
Sustainable Consumption Institute

MATERIALISING
SUSTAIN
ABILITIES
re-imagining futures

# Su'aalidda malaynta, boorinta kudaridda:

## War bixin kusaabsan baaritaan laxiriira sidii loo joogtayn lahaa bay'ada oo lala sameeyay Soomaalida degan Moss Side




Sherilyn MacGregor, Catherine Walker, Tally Katz-Gerro, Salah Abdisamad iyo Safia Abdulrahman

Sustainable Consumption Institute, ee Jaamacadda Manchester Manchester 2019

# MUHIIMADDA OO KOOBAN

Warbxintani waxay soo bandhigaysaa natiijooyin baaritaan la sameeyay 2018 oo ay sameeyeen baarayaal ka socda machadka Sustainable Consumption Institute (SCI) ee Jaamacadda Manchester iyagoo la kaashanaya xubno katirsan bulshada Somalida. Ujeedooyinka ugu waawayn ee baaritaankani waa:

- Si loo ogaado walaaca kusaabsan bay'ada ee ay qabaan dadka asal ahaan kasoo jeeda Somalida ee degan Moss Side oo ah xaafad ka katirsan magaalada Manchester.
- Si aan u sahmino waxa dhiirigeliya ama horistaaga kaqayb qaadashada deganayaasha ee leh dhaqan qoyseed yarayn kara waxyeelada bay'ada sida tashiilidda biyaha iyo tamarta iyo sidii loo celin wareejin (recycling) lahaa qashinka.

Waxaanu baaritaankan samaynay iyadoo ay soo ifbaxayaan muhiimadda ay leedahay qaybta ay dhamaan qoyska ka cayaaro rajada laga qabo sidii loo yarayn lahaa saamaynta xun ee bulshadu ku yeelaneyso bay'ada dabiiciga ah iyo habka cimilada.  Dhiiri gelinta 'taageerayaasha daryeela bay'ada' oo ka dhexmuuqda nadaamka bay'ada iyo ololaynta oo ay kamid tahay tashiilka tamarta iyo biyaha, celin wareejinta, nafaqada dhirta (compost), ka iibsato suuqaqa maxaliga, ashyaada dabiiciga ah, iyo inaad beer hagaajiso.  Ficiladan waxaa loogu talo galay sidii loo yarayn lahaa waxyeelada hab nololeedka dadka ee aadka wax u isticmaala ee hadana xiriirka la leh fakarka ah in loo noolaado sidii bay'ada loo joogtayn lahaa.

Mashruuceenu waxa uu ka jawaabayaa boos cilmiyeed banaan oo la ogyahay kuna saabsan sida soogalootiga kayimi Koonfurta Aduunka ayna u wajahaan habka joogtaynta marka ay yimaadaan inay ku noolaadan wadamada hodanka ah sida Ingiriiska (UK).  Waa muhiim markaa in la daboolo booskan banaan dhowr asbaabood awgood, Midda hore, waxaa mararka qaarkood lamaleeyaa in soogalootiga ayan fahamsanayn ama ayan danaynayn joogtaynta.  Waxaa intaa raaca waxaa badanaaba soogalootiga lagu tilmaamaa in ay 'adagtahay in lagaaro' ama 'ay ka qayb qaataan' sababo la xiriira dhaqan iyo kala duwanaansho xagga luqadda ah.  Inkastooy adagtahay in la cadeeyo, waxaa suurto gal ah in soogalootiga lagu eedeeyo hurumar la'aanta xagga tiigsiga bay'ada oo ay kamidka tahay heerka celin-wareejinta (recycling rates), eedayntani ayaa waxaa suurto gal ah in ay keento iskuxidhnaan la'aan ama wax kasii xun.

Waxaan dooranay inaan la shaqeyno deganayaasha asal ahaan kasoo jeeda Somalida, sababtoo ah waxa ay yihiin kooxaha ugu badan ee soogalootiga ah ee kayimi Koonfurta Aduunka ee kunool Manchester. Soomaalida ayaa waxaa kalooy yihiin kooxda ugu badan ee soogalootiga ah ee Moss Side, oo ah xaafad ku dhow Jaamacadda Manchester aan horayna oga sameynay baaritaan ku saabsan tayada bay'ada deegaanka. Ka sokoow weydiinta dadka Soomaalida ah ee deganayaasha ku aadan aragtidooda dhibaatooyinka bay'ada, waxaan rabnay inaan ogaanno dhaqan qoyseedka ku aadan dukaamaysiga, cunto karinta, isticmaalka biyaha iyo tamarta, iyo qashin tuurista.

Daraasadan ayaa waxaa bilaabay cilmi baarayaasha SCI oo la shaqeynayay xubnaha labada luqadoodlayaalka ah kana tirsan bulshada Soomaalida marxalad walba oo hawlaha cilmi baarista ah. Muddo kahor, Salah Abdisamad ayaa laga qoray inuu ahaado cilmi baare leh khibrad bulsho iyo xiriir xooggan oo deegaanka ah. Safia Abdulrahman ayaa kusoo biirtay kooxda intii lagu jiray wejiga xog ururinta oo waxay ku shaqeyneysay shaqo iskaa ah. Shaqadoodu waxay ku saabsanayd tarjumidda macluumaadka cilmibaarista, qorista kaqaybqaatayaasha, ururinta xogta, iyo tarjumidda natiijooyinka cilmibaarista. Kooxda waxaa caawinayay hay'adaha maxalliga ah iyo ganacsatada u adeega bulshada Soomaalida, oo ay ugu horeysay Hay'adda Daryeelka Bulshada ee Moss Side (The Somali Adult Social Care Agency in Moss Side).

Wadar ahaan 56 qof oo dad waawayn ah ayaa buuxiyay foomka sua'aalaheena, 16 ka mid ah kaqaybqaatayaasha waxay ka qayb-qaateen wareysiyo dabagal ah. Waxaa halkaa kasoo baxay natiijooyin dhowr ah kadib markaan falanqaynay jawaabaha su'aalaha iyo wareysiyada; Kuwaasoo si dheeraad ah loogu faahfaahinayo warbixintan. Kahor inta aan la dhameystirin warbixinta, dadka ka qeybqaatay cilmi baarista ayaa lagu casumay inay soo gudbiyaan warcelin ku saabsan qabyo-qoraalka. Jawaab celintan ayaa waxay kobcisay kalsoonidii natiijooyinka iyo talooyinka dadka ku lugta leh cilmibaaristan.

# MUHIIMADDA OO KOOBAN

## Natiijooyinka ugu waawayn

- Dadka Soomalida kasoojeeda ee ka qaybqaatay cilmibaaristan (oo halkan aan ugu yeernay 'ka-qaybgalayaasha') ayaa sheegay in ay qabtaan hawlo kala duwan oo loo arko inay yihiin qoysas kudhaqma danaynta bay'ada – (pro-environmental household practices (PEHP)), gaar ahaan ilaalinta biyaha iyo tamarta, in la yareeyo khasaarinta cuntada, iyo inay isku dayaan in ay soo iibsadaan alaab baakadayntoodu ay yartahay.
- Ka qaybgalayaasha intooda badan ma ayan fahamsanayn ereyga 'joogtaynta'(sustainability), erayagani ma laha tarjumaad afsoomaali oo toos ah. Si kastaba ha ahaatee, qiimaha iyo falanqeynta kaqaybgalayaasha ayaa ah mid ku jaango'an fikradda ah joogtaynta bay'ada.
- Sababaha ugu muhiimsan ee kaqaybgalayaasha ay u sheegeen inay ka walwalsanyihiin bay'ada ayaa ah: mabda'a Islaamka, keydinta lacagta, daryeelka dadka kale, iyo wacyiga in kheyraadka dabiiciga ah uu ku yaryahay dad badan ee adduunka.
- Ka qaybgalayaasha waxay inoo sheegeen in waxyaabaha u wanaagsanaa bay'ada ee ay ku samayn jireen Soomaaliya, ay kamid ahaayeen sida cunadoo lala wadaago deriska iyo beeridda cunada ay adagtahay in ay kusameeyaan Moss Side.
- Intooda badan ka qaybgalayaasha waxay sheegeen in aysan ku faraxsanayn tayada bay'ada ee xaafadooda, gaar ahaan cadada qashinka waddooyinka yaala iyo maqnaashaha meelaha cagaarka. Ka qaybgalayaasha waxay sidoo kale muujiyeen caro ku aadan adeegga wasakh ururinta.
- Ka qaybgalayaashu waxay yiraahdeen way arkaan muhiimadda celin-wareejinta, laakiin qaarkood waxay ahaayeen kuwo aan hubin ashyaada la celin-wareejinayo ama ay muujiyeen jahwareer ay abuurtay maqnaanshaha macluumaad buuxa.

## Talo soo jeedin

Warbixintani, waxaan ku soo bandhigaynaa talooyin aan u qaybinay seddex mawduuc oo si toos ah uga soo baxay natiijooyinkeena. Waxayna yihiin:

**Su'aalidda malaha:** Waxay cilmi baaristaan ogaatay in inta badan oo qiimaha iyo dhaqanka ay soo sheegaan dadka Soomaalida ee ku nool Moss Side ay la socdaan fikradda joogtaynta bay'ada. Sidaa awgeed waxay ka dhigantahay su'aalidda malaha ee dhahaya Soomaalidu madaneeyaan joogtaynta iyo in joogtaynta ay tahay fakar u gaar ah reer Galbeedka ayagana dibadda oga yimi. Cilmi baaris dheeraad ah iyo ka-qaybqaadasho ayaa loo baahan yahay si markaa loo daboolo aqoon la'aanta taasoo u sabab ah malaynta qaldan.

**Suurtogelinta kudaridda:** Haddii caqabadaha abuuray aqoon la'aanta iyo malaynta qaldan laga gudbo waxaa markaa fududaanaya in lagu daro dad badan oo kala duwan ajandaha joogtaynta. Warbixinta waxaa ku jira qaar ka mid ah tallaabooyinka la soo jeediyey si loo hubiyo in dadka Soomaalida deegaanka ay si firfircoon uga qayb qaadan karaan.

**Sameynta goobo iyo meelo loogu talagalay hawlgelinta maxalli:** waa in dib loo eegaa fakarka ah in ay 'adagtahay in lagaaro' ama 'la xiriiriyo' dadka Soomaalida ee deegaanka. In kastoo ay jiraan sababo dhaqameed iyo kuwo luuqadood ah oo u dhexeysa dadka Soomaalida ah iyo adeeg bixiyeyaasha aan Soomaalida ahayn, shaqaalaha dowladda hoose, iyo deriska, waxaa suurtagal ah in laga gudbo sababahan iyadoo loo tagayo dadkaas. Fakarka ah abuurista goobo iyo meelo loogu talagalay isdhexgal balaaran ayaa kujira warbixinta.

# TUSMADA


Muhiimadda oo kooban .......... 2

Hordhac .......... 5

Muhiimadda baaritaankan .......... 6

Mashruuca cilmibaarista .......... 6

Habka wada shaqaynta .......... 7

Ka qaybgalayaasha baaritaanka iyo ururinta xogta .......... 7

Tusmada baaridda .......... 7

Dib u eegidda bulshada ee natiijooyinka hordhaca ah .......... 9

Natiijooyinka baaritaanka .......... 10

Fahamka 'Joogtaynta' .......... 10

Sii wadista iyo isbeddelka dhaqanka qoyska .......... 10

Rabitaanka kunoolaashaha siyaabo joogtayn ah .......... 13

Caqabadaha ku noolaanshaha siyaabo joogtayn ah .......... 14

Munaaqashooyin .......... 17

Talo Jeedin .......... 18

Maalgelinta .......... 20

Mahadnaq .......... 20

Fiiro gaar ah .......... 20

# HORDHAC

Dawladaha iyo hay'adaha u ololeeya bay'ada ee addunka ayaa sanado badan ugu baaqayay in dadku ay u noolaadaan siyaabo u wanaagsan joogtaynta bay'ada. Ayadoo la eegayo cimilada degdegga ah, isbedelkani waa mid taagan, waxaana uu u baahanyahay in si firfircoon looga qaybqaato dhan walba, haba ugu horeeyaane heerarka magaalada iyo qoyska. Mid ka mid ah ujeedooyinka asaasiga ah ee ajendaha 2030 ee Qaramada Midoobay ee Joogtaynta Horumarinta waa in 'laga dhigo magaalooyin iyo deegaanka aadamiga mid loodhanyahay, nabadeysan, adkeysi iyo joogtayn'. Hadaan usoo noqonno deegaankeenna, Hamiga duqa Magaalada Andy Burnham ee gobolka Manchester ayaa waxa uu yahay sidii ay Manchester u noqon lahayd 'magaalo ku hogaamisa caalamka xagga cagaarka, nadaafadda, magaalo degmo adkaysi leh' taasoo loo sameeyo hab loo dhanyahay oo faa'iido u leh qof walba.

Waxaa jira dareen soo kordhaya ee doorka qoysasku ka ciyaaraan loona gaari lahaa hamiga sidii loo yarayn lahaa saameynta xun ee bulshada ku hayso deegaanka dabiiciga ah iyo nidaamka cimilada. Sidii kor loogu qaadi lahaa 'dabeecadaha habdhaqanka qoysaska deegaanka' in si joogto ah loogu daro siyaasadda deegaanka iyo ololaha, waxaana ka mid ah noocyo badan oo 'cagaar ah' oo si fiican loo yaqaan sida ilaalinta biyaha, celin-wareejinta iyo nafaqada dhirta, iibsashada alaabooyinka dabiiciga ah beera abuurashada. Farsamooyinkaan ayaa waxaa loogu talagalay in lagu yareeyo saameynta dadka reer galbeedka ee isticmaalka badan iyo siday ugu noolaan lahaayeen hab joogtaynta bay'ada ah. Laakiin fikradaha iyo farriimaha ku saabsan waxa loola jeedo joogtaynta ayaa ah mid kusalaysan qiimaha iyo qaab nololeedka dadka ku nool dalalka hodanka ah sida Ingiriiska. Inta badan cilmi-baarista ku saabsan joogtaynta ayaa waxay kusaabsantahay habka kunoolaashaha dadka ladan iyo sida ay tahay in ay isu beddelaan haddii ay doonayaan in ayan noqon kuwo aan tashiilin noqdaana kuwo daneeya bay'ada. Intaan ognahay ma jiraan wax cilmi baaris ah oo Ingiriiska ka jira oo tixgelinaya waxa laga baran karo dhaqanka maalinlaha ee shakhsiyaadka u soo guuray Ingiriiska kana yimi dalalka aan lahayn kheyraad badan oo ay isticmaalaan.

Waxaa baaristan sameeyay sanadkii 2018 cilmi baarayaal koox ah oo ka socota jaamacada iyo cilmi baarayaal la degan bulshada, daraasaddani waa dadaal loogu jiro in cilmi barista loo dhaqaajiyo jahada looga qaybgelinayo qof walba fahamka guud ee joogtaynta. Dadka dakhligoodu yar yahay, qowmiyadaha tirada yar iyo kuwa soo galootiga ah ee ka yimaada wadamada dakhliga yar kuna nool waddamada qaniga ah, badanaa laguma daro daraasaadka ku saabsan joogtaynta. Taa waxaaba kasii daran, waxaa badanaa lagu eedeeyaa inay ka masuul yihiin dhibaatooyinka bay'ada ee dalalka hodanka ah. Waxaa mararka qaar la aaminsan yahay in aysan fahmin sida loogu noolaado habka joogtaynta ah ama loo arko inay 'adag tahay in lala xiriiro' sababtoo ah waxa laga yaabaa inaanay 'dhexgelin dadka kale' ama baran luqaada maxaliga. Waa ay adagtahay in laga hortago malaynta maadaama ayan jirin fursado badan oo laisku weydaarsado fikradaha iyo khibradaha.

Warbixintani waxay soo bandhigeysaa natiijooyinka ugu muhiimsan ee daraasaddeena, ujeedaduna ay ahayd sidii loo ogaan lahaa sida dadka soogalootiga ah ee kasoo jeeda Soomalida ee ku nool Moss Side ay ula qabsan lahaayeen fakarka joogtaynta iyo sidii loo ogaan lahaa waxa hortaagan ama dhiiri geliya ka qaybgalka qoysaska kudhaqma danaynta bay'ada (pro-environmental household practices (PEHP), sida ilaalinta biyaha iyo tamarta iyo celin-wareejinta qashinka.

Mid ka mid ah sababaha aan daraasaddan u samaynay ayaa ah inaan rumaysanahay in wax badan oo ku saabsan qoysaska kudhaqma danaynta bay'ada ee soo galootiga ay caawin karayaan sidii ay siyaasad dejiyaasha u gaari lahaayeen himilooyinka joogteynta ah iyada oo ay weliba horumarineyso wadanoolaashaha bulshada. Sida magaalooyin kale oo badan oo ku yaal Ingiriiska, Manchester waxay hadda ku mashquulsantahay caqabadaha dadka kala duduwan siina kordhaya iyadaoo beegsanaysa bartilmaameedyada iyo higsiga bay'ada. Fahmka sida qiimaha, khibradaha iyo xiriirada qaabeeya habdhaqanka nololeed ee soogalootiga Soomaalida uu u qaabilayo agendaha joogtaynta bay'ada ayaa ah tallaabo muhiim ah oo ku aaddan ka shaqaynta caqabadahaas.

# MUHIIMADDA BAARITAANKAN

Cilmi baarista waxaa lagu sameeyay xaafadda Moss Side ee Manchester, oo ku taala deegaanka Manchester ee Gobolka Manchester (GM). GM waxaa ku nool guud ahaan dad gaaraya 2.8 milyan, intii u dhaxaysay sanadadii 2001 iyo 2011 Manchester waxay ahayd tirada labaad ee ugu badan tiro shacab oo koraysa kana soo jeeda dibadda[1] , iyadoo 8.6% dadkaas ay ku dhasheen magaalooyin dibadda ka ah Midowga Yurub[2]. Magaalada Manchester waxay hoy u tahay dad kaladuduwan oo leh heerar sii kordhaya oo xagga socdaalka ah kuwaasoo kayimi Koonfurta Aduunka, gaar ahaan tirada qowmiyadaha Afrikaanka ah ee degaya magaalada ayaa kor u kacay sannadihiii la soo dhaafay[3].

Dawlada hoose ee Magaalada Manchester (MCC), ayaa hadda ku hawlan hindisaha barnaamijka horumarinta bay'ada tusale ahaan siday u noqon lahayd magaalada ugu horreysa xagga 'nadaafadda' ee 'sannadka 2020'. Bishii March 2019, Magaalada Manchester waxay si buuxda u ansixisay qabyo-qoraalka hannaanka mashruuca 'Kaarboonka lagu simayo Eber 2020-2038' 'Zero Carbon Framework 2020-2038'. Isla markaa waxaa muhiim ah in la ogaado in Magaalada Manchester ay ku shaqeyneyso xaalado dhaqaale oo adag ka dib markii la dhimay miisaaniyadeeda (qiyaastii 38%) taasoo qayb ka ah tallaabooyinka Dawladda Dhexe ay kuxakameyneyso kharashkeeda tan iyo sannadkii 2010.

Moss Side waa xaafad leh taariikh dheer oo ay soogalootiga kayimi Africa iyo Kariibiyaanka ay degaan, iyo tirakoobkii sannadkii 2011 waxay ahayd Meesha labaad ee ay ugu badnaayeen dadka degan Deegaanka Manchester ee kudhashay Yurub (EU) banaankeeda iyo dalalka kale ee hodonka ah. Waqti dheer ayey xaafadani aheyd mid ka mid ah meelaha ugu saboolsan ee Ingiriiska (tusaale ahaan, 2017/18, 47% carruurta Moss Side ayaa noqday kuwo ku nool faqri, marka la eego qiimaha guryaha[4]), saboolnimadan ayaa markaa waxay abuurtay dhibaatooyin, oo ay ku jirto tayada bay'ada oo liidata (tusaale ahaan, guryaha oon dayactirnayn iyo dhibaatooyinka qashinka meel walba lagu tuuro) iyo ayadoo xaafadani tahay midda ugu hooseysa ee qashinka celin-wareejisa ama dib u isticmaalka[5].

Waxaan dooranay Moss Side in ay noqoto goobta daraasaddeena, sababtoo ah waa xaafad ku dhow Jaamacadda Manchester horayna aan oga sameynay cilmibaaris. Waxaan sii raacnay daraasad ay horay u samaysay mid ka mid ah qorayaashan sannadkii 2017, halkaasoo dadka deegaanka lagu weydiiyay siday u arkaan dhibaatada qashinka ee waddooyinka yaala[6]. Sababtoo ah daraasaddan oo lagu sameeyay luqadda Ingiriisiga oo keliya, waxaa ka maqnaa ra'yiga dad badan oo degganka ah. Tani waxay muujisay baahida loo qabo in la sameeyo cilmibaaris dheeraad ah oo loogu talagalay in lagu soo bandhigo fikradaha aadka ukala duwan ee dadka ku nool Moss Side.

Soogalootiga asalkoodu kasoo jeedo Soomaalida ayaa ah kuwa ugu badan ee aan ahayn yurub ee kunool Moss Side sida ku cad tirakoobkii ugu dambeeyay ee qaran. Tirada beesha Soomaalida ee ku nool Manchester ayaa lagu qiyaasaa 30,000, kuwaas oo intooda badan ah qaxooti uuna keenay dagaal sokeeye[7]. Moss Side iyo meelo kaleba, waxaa jira fakar ah in Soomaalidu ay 'adagtahay in lala xiriiro ama la gaaro' sababtuna ay tahay caqabadaha luqadda iyo dhaqanka, iyo inay u badantahay inay u noqdaan masaajidada iyo ganacsiyada si ay u daboolaan baahidooda halkii ay dhexgeli lahaayeen bulshada kale[8]. Fakarka ah in Soomaalida ay 'adagtahay in lala xiriiro'[9] ayaa markaa nasiiyay sabab dheeraad ah in aan u dooranno sambalka Soomaalida daraasadeena.

Ma jiro wax daraasaad ah oo aan ognahay oo eegay walaaca bay'ada iyo fahamka Soomaalida ku nool ingiriiska (UK) ama sida ay xubnaha bulshadani oga jawaabaan joogtaynta iyo agendaha lagu xadidayo isbeddelka cimilada maalin kasta oo noloshooda kamid ah.

Ujeedada guud ee daraasaddeena waxay ahayd in la sahmiyo sida fahamka dhaqanka, qiimaha, habdhaqanka iyo xiriirka ay u qaabeeyaan muhiimada bay'ada ee qoysaska soogalootiga ah ee Moss Side. Ujeedadani waxaa loo fasiray laba su'aalood oo cilmibaaris muhiim ah oo ah midda wada daraasaddan.

- Ma leeyahay dhaqamo saamayn kuyeesha bay'ada, sida raashin bixinta, isticmaalka biyaha iyo celin-wareejinta qashinka ma isbedelay ama sidiisii buu yahay, intii ay kuguda jireen geeddi-socodka ay ka soo bexeen Soomaaliya ilaa Ingiriiska.
- Waa maxay waxyaabaha dhiirigeliya ama joojiya in soogalootiga ay ka qayb qaataan ajandaha joogtaynta bay'ada ee la xiriira dhaqamadaan?

## Habka wada shaqaynta

Daraasadan ayaa waxaa sameeyay koox ka kooban saddex macalimiin oo leh khibrado kala duduwan kana socda Jaamacadda Manchester, iyagoo kaashanaya laba cilmi baarayaal oo ka socda beesha Soomaaliyeed. Salah Abdisamad iyo Safia Abdulrahman waxay soo jeediyeen talooyin ku saabsan qaabeynta baaristan iyo qawaaniinta waraysiga, waxay fududeeyeen xiriirka lala sameeyay odayaasha ama madaxda, waxay naga caawiyeen in aan la xiriirno ka qaybgalayaasha, iyo inay naga caawiyeen tarjumaadda intii aanu ururinaynay xogta. Waxay kaloo tarjumeen dukumiintiyada cilmibaarista ee Afsoomaaliga kadibna dib loogu turjumay Ingiriisi si loo ogaado inay sax yihiin. Nidaamkayaga xog uruurinta waxay ku lug leedahay la shaqeynta ururrada maxalliga ah iyo ganacsiga u adeega bulshada Soomaaliyeed, gaar ahaan Hay'adda Daryeelka Bulshada ee Qaangaarka ah (Somali Adult Social Care Agency), Somali Link, masjidka Al Furqan, Adeegga Sharciga ee Cohesion (Cohesion Legal Services), Maktabadda Powerhouse (Powerhouse Library), iyo Dugsiga Hoose ee Claremont (Claremont Primary School).

## Ka qaybgalayaasha baaritaanka iyo ururinta xogta

Daraasadu waxay ku saabsanayd baaritaan ay soo buuxiyeen 56 qof oo dad waawayn ah kana soo jeeda Soomaalida deggan Moss Side iyo wareysiyo qoto dheer oo aan layeelanay 16 ka mid ah dadka kasoo jawaabay baaritaankan. Ka qaybgalayaashu waxay buuxiyeen daraasad ku qoran Ingiriisi ama Soomaali iyagoo kusugnaa goobo dadweyne, oo ay kamid tahay masaajid, iskuul bannaankiisa iyo ganacsiyo ay leeyihiin Soomaali. Waxaan ka codsanay dhammaan kaqeybgalayaasha in ay buuxiyaan foomam aad ufudud oo aan cadaynayn cida ay yihiin, Taasoo noo suurto gelisay inaan soo bandhigno sawirka dhabta ah ee sambalkeena (Jadwalka 1).

**Jadwalka 1: Calaamadaha sambalka baaritaanka**

| | | % of sample |
|---|---|---|
| Jinsi | Haween | 47 |
| | Rag | 53 |
| Waxbarashada | Dugsiga Hoose | 34 |
| | Dugsi sare iyo ka kor | 56 |
| Xaaladda Shaqo | Shaqeeya waqti buuxa | 40 |
| | Shaqeeya waqti dhiman | 16 |
| | Shaqolaawe ama Mashaqeeyo | 42 |
| Xaaladda Shaqo Dakhliga qoyska | Kayar £10,000 | 31.6 |
| | £10,000-£15,000 | 19.3 |
| | £15,000-£20,000 | 14.0 |
| | £20,000-£25,000 | 15.8 |
| | £25,000-£30,000 | 5.3 |
| | £30,000-£35,000 | 3.5 |
| | Madoonayo inaan sheego | 10.5 |
| Waqtiga Ingiriiska kusugnayd | Ilaa 5 sano | 8.8 |
| | 5-10 sano | 33.3 |
| | 11-20 sano | 33.5 |
| | 21-29 sano | 22.6 |
| | Kabadan 29 sano | 1.8 |

# Tusmada baaridda

Xogururintani waxaa ku jiray su'aalo ku saabsan laba qaybood oo waaweyn. Marka hore, ka qaybgalayaasha waxaa la weydiiyay in ay tilmaamaan tiro ahaan heerka ay ka walaacsanyihiin, iyaga oo calaamadinaya laga bilaabo 'aad oga walwalsan' ilaa iyo 'ma walwalsani'.

### Muuqaalka 1: Su'aalaha baaritaanka eek u saabsan walaaca bay'ada

| | Walaac wayn → | | | | Walaac la'aan |
|---|---|---|---|---|---|
| Cadadka qashinka ee deegaankayga | 😭 | ☹️ | 😐 | 🙂 | 😃 |
| Walxaha waaweyn ee la tuuray, sida baabuurta, firinjeerada ama kuraasta fadhiga | 😭 | ☹️ | 😐 | 🙂 | 😃 |
| Urka kasoo baxa qashinka looga tagay meelaha | 😭 | ☹️ | 😐 | 🙂 | 😃 |
| Tirada beeraha halaysan aadka u baxay ama dhulka la dayacay | 😭 | ☹️ | 😐 | 🙂 | 😃 |
| Hawo wasaqaysan oo aan wanaagsaneyn in la neefsado | 😭 | ☹️ | 😐 | 🙂 | 😃 |
| Cayayaanka sida jiirka, shimbiraha ama duqsiga | 😭 | ☹️ | 😐 | 🙂 | 😃 |
| Saxarada ayda oo looga tegay wadada | 😭 | ☹️ | 😐 | 🙂 | 😃 |
| Goobaha cagaarka oo aan ka jirin deegaankayga | 😭 | ☹️ | 😐 | 🙂 | 😃 |

Marka labaad, ka qaybgalayaasha ayaa la weydiiyay sida badanaa ay u sameeyaan soo noqnoqoshada qoysas kudhaqma danaynta bay'ada (oo ku qoran Jadwalka 2), xulashada fursadaha 'marwalba', 'inta badan', 'marar dhif ah' iyo marnaba '. Iyadoo ku saleysan jawaabteeda, ka qaybgalayaasha ayaa la weydiistay inay bixiyaan sababaha ugu weyn ee ay u qabtaan ama u fuliyaan dhaqamadaas.

Kadib markii aan dhameystirnay wajigii sahanka, waxaan wareysannay sagaal nin iyo todoba dumar ah oo muujiyay kalsooni in ay nagula hadlaan af Ingiriis. cilmi baare kuhadla af Soomaaliga ayaa goob joog ahaa wareysiyada intooda badan si uu u tarjumo markii loo baahdo. Dadka aanu waraysanay da'doodu waxay u dhaxaysay 27 ilaa 62 jir, sanadada ay ku noolaayeen Ingiriiska waxay u dhexeeysaa 5 ilaa 32 sano. Dhammaan hal qof mooyee inta kale la wareystayaashu waxay ku dhasheen Soomaaliya.

Waxaan u qabanay wareysigan si aan u ogaano macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan jawaabaha ka qaybgalayaasha ee kusaabsan su'aalaha baaritaankan. Waraysiyada, oo soconayey illaa hal saac, waxaan weydiinay dadka qoysaska kudhaqma danaynta bay'ada waqtigii hore iyo imika waxa dhiirigeliya sida ay ugu sameeyaan habab gaar ah. Waxaan kaloon weydiinnay fakarka ay ka qabaan joogtaynta iyo aragtidooda ku aadan tayada bay'ada iyo adeegyada maxalliga ah ee Moss Side.

Xogaha laga soo ururiyey 56 baaritaan ayaa lagu falanqeeyay iyadoo la adeegsanayo aalad combiyuutar oo loo yaqaan 'SPSS' iyo wareysiyada oo si xirfad ah loo qoray. Waxaan falanqeynay macluumaadkaa aanu soo ururinay inagoo tilmaameyna mawduucyo dhowr ah iyo tilmaamo soo noqnoqday oo kusalaysan waxa ay dadku noo sheegeen. Ka dib markii aanu isku ururinay xogihii aanu helnay ayaa waxaanu lawadaagnay cilmi baarayaasha Soomaalida oo bixiyay war-celin iyo talooyin.

## Dib u eegidda bulshada ee natiijooyinka hordhaca ah

Natiijooyinka horudhaca ah ee cilmi baarista ayaa waxaa lala wadaagay kaqeybgalayaashii ka hor intii warbixintan la dhamaystirin. Bishii Abriil 2019 ayaanu waxaan qabanqaabinay kulan bulsho kunaqabanay Dugsiga Hoose ee Claremont (DHC) halkaas oo aan kusoo bandhignay lalana wadaagnay cilmi baarista xubnaha bulshada, xildhibaan degaan, wakil kasocda Masjidka Al Furqan, iyo xubno ka tirsan kooxaha bulshada ee naga caawiyay cilmi-baaristan. Si aanu u fududeeyno falanqaynta, waxaa naga caawiyay xubin Soomaaliga ku hadla oo katirsan shaqaalaha Dugsiga Hoose ee Claremont (DHC) kaasoo tarjumay bandhigeena. Ka qaybgalayaasha ayaa lagusoo dhoweeyay in ay dhiibtaan fikirkooda si hadal ah ama ay ku qoraan waraaqo. Mid ka mid ah su'aalahayaga gaarka ah ee aanu weydiinay kaqaybqaatayaasha ayaa ahayd 'waa maxay fariimaha ugu muhiimsan ee aan ku darno warbixinteenna'?

**Muuqaalka 2: Soo bandhigidda natiijooyinka cilmi baarista ee hordhaca ah**



Dadka deegaanka ee kasoo jeeda Soomaalida ayaa waxay ka kooban yihiin qayb muhiim ah ee tirade dadka ee Ingiriiska, tiradaa oo dhan 101,130 qof tirakoobkii 2011. Dadkani waxaa ay ku uruursanyihiin magaalooyin badan oo Ingiriiska ah, kuwaas oo Manchester ay ka mid tahay dadka ugu badan. Tani waa baaritaankii koowaad ee cilmi baarista ah ee aan ognahay oo qaadaysa su'aalo ku saabsan joogitaanka bay'ada ee bulshada Soomaalida ee Manchester ama meel kale oo Ingiriiska ah.

## Fahamka 'Joogtaynta'

Waxaa macquul ah inay run tahay in dad badan oo ku nool Boqortooyada Ingiriiska, ayadoon loo eegayn asalkooda, inayan karayn inay sharxaan micnaha 'joogtaynta'. Waxaa xaqiiqa ah in marar badan la ogaaday in fakarkaa uu ku koobanyahay oo keliya guud ahaan dadka 'la socda' arimaha bay'ada. Si kastaba ha ahaatee, waxaan u maleyneynaa inay muhiim tahay in aan ogaano heerka fahamka ee ka dhex jira ka qaybgalayaasheena.

Ma jiro eray toos ah oo ingiriis ah oo u dhigma ereyga 'joogtaynta' markaan eegno luqadda ay ku hadlaan ka qaybgalayaasha daraasaddeena[10]. Salah iyo Safia, labadaba cilmi baarayaal ee af Soomaaliga ku hadla waxay ay dareensanyihiin in cinwaanka aan u adeegsanay mashruuca xilliga ururinta xogta 'Environmental Sustainability in Manchester', loo tarjumi karaa sida ugu dhow Joogtaynta Bay'ada ee Manchester, oo dhab ahaan micnaheedu noqonayo 'sii wadid' (joogitaanta) ee 'bay'ada' (bay'ada) ee Manchester. Waxaan weydiinay dhamaan dadka la wareystay inay sharaxaan waxa, haddii ay jiraan, ay ufahmeen micnaha 'joogtaynta bay'ada'. Haddii la weydiisto caddaynta, wareysi bixiyaha sharaxaad ku saabsan joogtaynta wuxuu ku qeexay 'in dadku hadda u dhaqmaan siyaabo macnaheedu yahay in jiilalka mustaqbalka ay heli karaan khayraadka ay u baahanyihiin inay si wanaagsan ugu noolaadaan mustaqbalka ayna sii wadaan inay ku raaxaystaan nolosha adduunkeena'. Ereygan ayaa u muuqday inuu isku aragti kadhigay ka qaybgalayaasha intooda badan, ka dibna sii faahfaahiyay aragtidooda, iyagoo tixraacay caafimaadka, isudheelitirka, iyo masuuliyadda. Shaqsi ayaa utarjumay sharraxaadda waraystaha joogtaynta waxuu isaga ugu muuqday micne uu garanayo oo kasoo jeeda diinta Islaamka ee uu rumaysanyahay: 'Isticmaal waxa aad ubaahantahay; ha isticmaalin waxaadan ubaahnayn '. Kaqaybgalayaasha kale waxay sidoo kale xoojiyeen fakarka ah joogtaynta inay micnaheedu tahay in la isticmaalo waxa kaliya ee lagama maarmaanka ah si loo helo wax nagu filan mustaqbalka. Sida haweeney ay u sharaxday, 'Waxaan had iyo jeer u sheegaa caruurteyda haddii aad maanta qasaariso, waxaa suurto gal ah in aadan helin berito … waa inaad ka fakartaa taas'.

Inkastoo kaqeybgalayaasha intooda badan aysan ka fakarin hab dhaqankooda maalmeed marka loo eego joogteynta, marka ereyga la sharxay, waxay isku raaceen in wax aad ugu eg waxaa la sharxay ay ka ciyaaraan qayb muhiim ah go'aankooda maalin kasta. Micnaha waa uu jiray, iyadoo aan ereyga la isticmaalin.

## Sii wadista iyo isbeddelka dhaqanka qoyska

Waxaan xiiseyneynaa inaan ogaanno sida waayo aragnimada ay kala kulmeen geediga ay kaga yimaadeen Soomaaliya ayna ku degeen Ingiriiska ay u saamaysay si ay uga qaybqaataan kaqaybgalayaasha hawlaha loo arko 'cagaarka' iyo 'joogtaynta' ee heerka Ingiriiska iyo sida ay isu barbardhigaan siyaabaha ay ugu nool yihiin labada meelba.

Xogta iyo wareysiyada laga soo ururiyay baaritaankan ayaa sheegaya sheeko xiiso leh sida sii wadida iyo isbeddelka qoysas kudhaqma danaynta bay'ada, siiba saddex qeybood: i) In la ilaaliyo biyaha iyo tamarta; ii) yaraynta qashinka, iyo iii) Ku raaxeysiga jawiga dabiiciga ah

### Jadwalka 2: kaqaybgalayaasha qoysas kudhaqma danaynta bay'ada marhore iyo hadda

| Intee baad... | 1 Marnaba % | 2 Mar dhif ah | 3 Marmar | 4 Inta badan % | Waxaan kusameeyay wadankaan ka imi % |
|---|---|---|---|---|---|
| Isku daydaa inaadan biyo khasaarin | 5.4 | 3.6 | 37.5 | 51.8 | 96.3 |
| Isku dayday inaadan koronto badan isticmaalin | 5.4 | 19.6 | 42.9 | 32.1 | 78.2 |
| Iibsatay cunno dabiici ah ama 'alaab kuqoran 'usaaxiib ah bay'ada' | 16.1 | 48.2 | 25.0 | 10.7 | 76.4 |
| Ku beeratаa cunadaada guriga ama beeraha beesha. | 79.6 | 11.1 | 9.3 | 0 | 57.4 |
| Iska ilaalisaa isticmaalka bacaha lagu adeegto | 17.9 | 21.4 | 39.3 | 21.4 | 50.0 |
| Celin wareejisaa cunnada harta adoo isticmaalaya caagga cagaaran | 7.3 | 12.7 | 36.4 | 43.6 | 46.2 |
| Celin wareejisaa qashinka qoyska | 7.1 | 16.1 | 32.1 | 44.6 | 39.6 |
| Cuntay cunno ay kuyartahay dheefta xoolaha | 22.2 | 31.5 | 37.0 | 9.3 | 37.0 |

**i) In la ilaaliyo biyaha iyo tamarta**

Ka qaybgalayaasha intooda badani waxay inoo sheegeen inay isku dayayaan muhiimna ay u tahay in ay ilaalinayaan biyaha iyo tamarta sidii ay horay ugu ilaalin jireen Somaaliya ayay Manchesterna ugu ilaalinayaan:

- 89.3% waxay iskudayaan inaysan khasaarin biyaha Manchester, iyo 75% waxay isku dayaan inaysan khasaarin tamarta.
- 96.3% waxay isku dayeen inayan khasaarin biyaha Soomaaliya iyo 78.2% waxay isku dayeen inaysan khasaarin tamarta.

Ka qaybgalayaasha ayaa sheegay in biyaha iyo korontada ay si fudud oga heli karaan Manchester marka loo eego Soomaaliya. Qaarkood waxay xasuusteen abaaro xilliyeed iyo koronto goynta Soomaaliya ama Kenya. Qaarkood ayaa sheegay in biyaha iyo korontada diyaarka ah ee Ingiriiska ay macnaheedu tahay in caruurtoodu aysan qiimeeyn kheyraadkan sida ay iyagu u qiimayn jireen. Ku dhowaad dhammaantood waxay isku dayeen inay ubadkoodu baraan inay u isticmaalaan khayraadka si masuuliyad kudheehantahay Tusaale ahaan:

> *'Dhallinyaradaani, uma arkayaan dunida sida aan u aragno, waana inaan barnaa iyaga. Waa inaan tusno sida ay muhiim u tahay inay ilaaliyaan dhulka iyo biyaha iyo tamarta. Soomaalidu waxay mas'uul ka yihiin wax walba, laakiin halkan dadku waa kuwo taxadar la'aan ah. Sababtoo ah bay'ada ayaa caawineysa oo ma walwalaan. '*

**ii) Yaraynta qashinka**

Ka qaybqaatayaashu waxay soo sheegeen celin-wareejin aad u sareysa. 76.7% ayaa sheegay in ay qashinka celin-wareejiyaan, 80% waxay sheegeen in ay dib u celin-wareejiyaan cunada haraaga ah. Si kastaba ha ahaatee, kaqeybgalayaashu waxay wareysiga lalayeeshay kusheegeen in wax laga bedeli karo nidaamka celin-wareejinta ee deegaankooda. Waxay yiraahdeen caagagga celin-wareejinta ee yaala luuqyada danbe  oo ay keentay dowladda hoose, marwalba waa ay buux dhaafaan, waana wasakh. Waxay sidoo kale xuseen in sharciyada ku saabsan celin-wareejinta ay u muuqdaan kuwo isbedelaya iyadoon la ogeysiinin dadka. Dhowr qof ayaa sheegay in ay cadaalad daro tahay in iyaga la yiraahdo bixiya lacagta caagagga lawaayo.

46.2% ayaa xusuustay inay celin-wareejiyaan haraaga cunada iyo 39.6% qashinka guriga markii ay Soomaaliya joogeen.

Isbedelkan macnahiisu ma'aha in qashin badan lagu tuuray Soomaaliya iyadoon la celin-wareejin. Taa waxay macnaheedu noqon kartaa in qashin yar lagu isticmaalay Soomaaliya. Tusaale ahaan:

- Wareysiyada kaqeybgalayaashu waxay xusuusteen inay iibsadaan oo keliya waxa ay u baahanyihiin maalintaa wadankii Soomaaliya (iyo inta badan sidoo kale Manchester). Sida kaqaybgale uu yiri: 'Wax walba waa fareesh. [Dadka] waxay aadaan suuqa waxayna soo iibsadaan waxa ay u baahanyihiin maanta, berri waa maalin kale, maalinta xigtana waa mid kale.'
- Waxay sidoo kale dib u xusuusteen cunno wadaagista u dhaxeysa qoysaska ehelka iyo xubnaha bulshada ee baahida gaarka ah leh ee Soomaaliya: 'ma tihid keligaa, waxaad la nooshahay koox 10 qof [...] wadaagida raashinka, sheekooyinka, wadaagista hawlaha'. Farsamadan oo inta badan dadka la wareystay noo sheegeen in aysan kusii wadi karin Manchester, waa hab kale oo u sabab ah in qashin yar la soo saaro.
- Farqiga kale wuxuu ahaa in inta badan cuntada la cuno ee Soomaaliya lagasoo saaro wadanka gudahiisa. Ka qaybgalayaashu waxay muujiyeen niyadjab ku saabsan dahaarka bacda ah ee Manchester oo aan dib loo celin-wareejin karin, tusaale ahaan, 'Mid ka mid ah sababaha ugu weyn ee aan u joojiyay dukaamada qaar [dukaamada waawayn] waa [sababtoo ah] dahaarkoodu ayaan aqli gal ahayn'.

### iii) Kuraaxeysiga jawiga dabiiciga ah

Ka qaybgalayaasha ayaa waxay ka hadleen isbeddel weyn oo ku saabsan sida ay u daryeelayaan bay'ada dabiiciga ah ee Manchester marka loo eego Soomaaliya. Halkan waxaan ku tilmaameynaa tayada deegaanka dabiiciga ah, oo ay ka mid tahay helitaanka hawo nadiif ah iyo meelo banaan oo dibadda kuyaala iyo sidoo kale xaaladda jidadka iyo luuqyada. Kartida in aad ku raaxaysato oodna kunoolaato meel cagaar ayaa mid muhiim ah.

- 64.3% ka qaybgalayaashu waxay yiraahdeen in deegaanka Moss Side uu 'aad u xun' ama 'xunyahay'.
- In ka badan 85% ayaa sheegay inay ka walwalsanyihiin cayayaanka, qashinka, walxaha latuuray iyo urka qashinka.

#### Jadwalka 3: Walaaca kaqaybgalayaasha ee ku saabsan bay'ada maxalliga

| Ilaa inteebay arimahan hoose ku walwal geliyaan? | 1 Kama walwalo % | 2 Waan walw-alsanahay | 3 Dhexd-hexaad | 4 Walaac % | 5 Walaac badan % | Darajada dhexdhex-aadka (5-1) |
|---|---|---|---|---|---|---|
| Cayayaanka | 0 | 3.6 | 7.3 | 12.7 | 76.4 | 4.62 |
| Tirada qashinka | 1.8 | 5.3 | 7.0 | 10.5 | 75.4 | 4.53 |
| Ashyaada waawayn ee latuuray | 5.3 | 3.5 | 14.0 | 15.8 | 61.4 | 4.25 |
| Urta ka imanaya qashinka | 3.6 | 12.5 | 3.6 | 17.9 | 62.5 | 4.23 |
| Beerta aadka u baxday/dhul aan la isticmaalayn | 3.6 | 8.9 | 16.1 | 25.0 | 46.4 | 4.02 |
| Hawo wasakh ah | 3.6 | 8.9 | 19.6 | 19.6 | 48.2 | 4.00 |
| Saxarada ayda | 5.5 | 14.5 | 18.2 | 25.5 | 36.4 | 3.73 |
| Maqnaashaha dhul cagaar ah | 3.5 | 14.0 | 26.3 | 19.3 | 36.8 | 3.72 |

Ka qaybgalayaashu waxay noo sheegeen qaar ka mid ah sababaha ay ugu raaxeysan waayeen banaanka sidii ay ugu raaxaysan jireen Soomaaliya. Tusaale ahaan, 'ma jiraan wax bay'ad ah halkan', taasoo macnaheedu yahay inaysan jirin meelo banaan oo ay carruurtu ku ciyaaraan. Qaar kale waxay ka faalloodeen qashinka xaafadda, sheegayna in aad 'daal dareemayso bay'ada darteed' iyo 'Moss Side oo uu meel walba qashin yaalo'

Isbeddel kale ayaa ahaa in 57.4% oo ka mid ah kaqeybgalayaasha ay dib u xasuusteen in ay cuntada beeran jireen, laakiin 79.1% ayaa sheegay in aysan waligood ku beeran cunno Manchester iyo 11.1% ayaa yiri 'marar dhif ah' ayaan cunno beeranay. Kaqaybgalayaasha waxay sheegeen in ayan beeran cunno maxaa yeelay ma ayan helin meel ay kubeertaan, cimilada oon ku haboonayn iyo inaanay garanaynin sida ay u beeran lahaayeen dhirtii ay yaqiineen.

## Rabitaanka kunoolaashaha siyaabo joogtayn ah


Waxaan ogaanay waxa dhiirigeliya la xiriirka kaqaybgalayaasha (ama la'aanteed) qoysas kudhaqma danaynta bay'ada inaytahay laba siyaabood: marka hore markaad waydiiso kaqaybgalayaasha inay doortaan hal ama dhowr sababood oo ah sababta ay marwalbo, marar dhif ah, marar qaarkood, ama marnaba ku dhaqmin habdhaqan gaar ah, ka dibna aan raadino macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan kaqaybqaatayaasha ogolaaday in la wareysto.

Sawirkan hoose wuxuu tusayaa tusaale su'aal kujirta baaritaankan (tan oo kusaabsan tashiilidda biyaha, taasoo sida muuqata ah habdhaqankii ugu badnaa ee la sameeyo oo labaduba hadda iyo wakhtigii hore). Tani waxaa kuxiga garaaf isukeenay jawaabta su'aashan, oo muujinaysa sababta ay ka qaybqaatayaasha oga jawaabeen biyo tashiilidda[11].

### Muuqaalka 3: Intee jeer ayaad isku daydaa inaadan biyo khasaarin? (Su'aalaha sahminta iyo jawaab celinta)

| 1. 1. Ma isku daydaa in aadan biyaha khasaarinin (sida qaadashada qubays gaaban, ururinta biyaha roobka si loogu waraabiyo dhirta)? | | | |
|---|---|---|---|
| Marnaba | Marar dhif ah | Inta badan | Had iyo jeer |
| **Maxaa sabab ah? (Dooro ilaa labo sababoo waawayn**<br>❑ Waa arin aan munaasab ahayn meesha aan ku noolahay<br>❑ Uma aan baran inaan sameeyo arinkan<br>❑ Sababtoo ah dowladdu ma samayneyso wax ku filan arinkan<br>❑ Maxaayeelay uma maleynayo inay isbedel sameyneyso<br>❑ Ma garanayo sida loo sameeyo<br>❑ Anigu ma daneeyo arrintan<br>❑ Kuwo kale - fadlan ku sheeg halkaan: | | **AMA sababtee? (Dooro ilaa labo sababoo waawayn)**<br>❑ Walaac laga qabo bay'ada / dabiiciga<br>❑ Sababo diimeed<br>❑ lacag dhaqaalayn<br>❑ Waa wax aan marwalba sameeyo<br>❑ Sababo nadaam ama olole dawladeed<br>❑ Sabab qoys ama cadaadiska saaxiibada<br>❑ Sababtoo ah mulkiilaha gurigayga ayaa ii sheegay<br>❑ Kuwo kale - fadlan ku sheeg halkaan: | |

**Dhiirigelinta tashiilka biyaha**



Waxaan ogaanay in kaqaybgalayaasha ay leeyihiin waxyaabo badan oo dhiirigelinaya in ay ku noolaadaan siyaabo joogtayn ah. Sababaha ugu muhiimsan ee ay bixiyeenna waxay ahaayeen: dareenka caafimaadka, daryeelka dadka hadda iyo mustaqbalka, caqiidooyinkooda diimeed iyo inay si fudud u qabtaan 'waxay mar walba qabanayeen'. Xogahani oo laga soo qaatay wareysiyada ayaa caawinaya faahfaahinta sababahan.

*'Waxa ka dhaca Afrika waxay saameyn kartaa Yurub, waxa ka dhaca Yurubna waxay saameyn karaan qaybaha kale ee aduunka. Sidaa daraadeed waa waxaas oo dhan, waxaan ku jirnaa caalamkan, caalamkuna wuxuu u baahanyahay inuu wada shaqeeyo. '*

*'Muhiimadu waa sidii waxyaabahan aan ugu sameyn lahayn dhallinyaradeena. Sidaanu ugu ilaalin lahayn bay'ada, maadaama ay yihiin jiilka cusub.*

*'Mararka qaarkood waan walwalaa, waxaan la yaabanahay meesha adduunku ku socdo, dhulku, waxay u muuqataa inuu qashin ka buuxo, caag ka buuxo, ay ka buuxaan waxyaabo aan ku haboonayn bani'aadamka.'*

*'[Soomaaliya] haddii ay kuu soo harto cunno, waad siin kartaa, waxaa jira dad aan cunno haysan inay maalin walba gurigaaga yimaadaan, waad siin kartaa cunadaas. Dadkaas, waad ogtahay, xitaa deriska, deriska qaarkood ma haystaan shaqo ama mahaystaan lacag ku filan, sidaa darteed waad caawin kartaa.'*

*'Adoo eegaya diinta Islaamka, isticmaal waxaad u baahantahay'*

*'Xitaa diintayda, markaan wayso qaadanayo-sida, waantukanaa, waa inaad is dhaqdaa–waxay leedahay, "ha isticmaalin biyo badan". Waxaa jira dad aan biyo haysan, waana inaad sidaas u fakartaa adiguna. Waxaan leeyahay naxariis balaaran oo ku saabsan biyaha. Dadka kale xitaa biyo ma haystaan'*

## Caqabadaha ku noolaanshaha siyaabo joogtayn ah

Waxaan kaloon xiiseynaynay inaan ogaano sababta ay kaqaybgalayaasha ayan udhicin ama marar dhif ah u noqotay in lagala xiriiro arimaha ku lugleh qoysas kudhaqma danaynta bay'ada. Jawaabaha baaritaanka, oo ay weheliso waraysiyo qotodheer ayaa waxay noo sheegayaan in sababta ugu weyn ee dadku aanay u sameynin waxyaalahan aysan ahayn in ayan muhim ahayn, laakiin xaaladaha ay ku nool yihiin ayaa ka dhigaysa mid dhib badan ama xataa aan macquul ahayn inay sameeyaan.


Markaa tani waxaa la oran karaa khaas ahaan waa run marka la eego celin-wareejinta. Sida kor ku xusan, waxaa jiray koror muuqda oo udhexeeya dhaqanka kaqeybgalayaasha ee celin wareejinta ee Soomaaliya, xagaas oo ay jireen heerar qashin oo yar, iyo Ingiriiska. Qashinka badan ee kasoo baxa Ingiriiska ayaa sababay in kaqaybgalayaasha ay arkaan macquulnimada celin-wareejinta, sida uu arkay mid ka mid ah kaqaybgalayaasha: 'haddii ay jirto sabab macquul ah waad qaadan nidaamkaas'. Si kastaba ha ahaatee, ku dhawaad dhammaan dadka la wareystay ayaa waxay aqoonsadeen dhibaatooyinka nidaamka, gaar ahaan qashinka oo buuxdhaafay iyo caagagga qashinka oo qurmay aanna laqaadin.  Tani waxay si gaar ah oga tarjumaysaa gaar ahaan kaqeybgalayaasha kunool meelaha lawadaago caagagga celin-wareejinta (oo ku yaalla hareeraha luuqyada guryaha iskuyiilay). Sida mid ka mid ah kaqeybgalayaashu uu sheegay:

*'Caagagga qashinka xaaladoodu ayaa ah mid aad u xun, majiro qof doonaya inuu meeshaa sii joogo. Waxaan isku daynay inaan Meesha kadhigno meel fiican oo nadiif ah, laakiin haddii dowladda hoose aanay nasiinayn qalab, ma sameyn karayno.'*

Waxaa intaa dheer, kaqeybgalayaasha qaar ayaa ku sheegay waraysiyadooda in ay doonayaan in ay yareeyaan cunta qasaarinta, iibsadaan cunto dabiici ah ama ay beertaan cunto sidii ay horeba u samayn jireen inta aysan iman Manchester. Hase yeeshee, uma suuroobayso kaqaybgalayaasha in ay cunto ku beertaan Meesha ay kunoolyihiin, fursadahooda adeegga ayaa ah mid ku kooban dukaamada waawayn

oo aan lagu aqoonin cunada dabiiciga ah iyo la'aanta alaabta bacaha kudahaaran.  Xogta baaritaanka ayaa muujinaysa aragti guud oo ah in tani ay tahay mid aan haboonayn iyo waqti-dhumis, oo aysan ahayn wax ay kaqaybgalayaasha ay kusamayn karaan Manchester, inkastoo ay tani ahayd mid caado ahady inay kusameeyaan Soomaaliya.

### Jadwalka 4: Sababaha kaqaybgalayaasha ayan u beeran karayn cunadooda[12]




Jawaabaha baaritaanka ayaa tusaya in tiro hawlo ah oo kaqeybgalayaasha ay sheegeen in aysan garanaynin sida loo sameeyo ama loo isticmaalo wax qabad, hase yeeshee wadahadalka ayaa muujinaya in aysan ahayn karti la'aan ama garasho la'aan laakiinse aanan la siin taageero ama macluumaad. Tusaale ahaan, marka la eego celin-wareejinta, mid ka mid ah kaqaybgalayaasha ayaa yiri:

> *'Haysashada caagga qashinka ee wadaagga ah, waxay la mid tahay iyadoo waxwalba laisku darayo, bay'ad ahaanna wax fiican oo lasameeyo ma aha. Maxaa yeelay cid ilaalineysa maleh, ogeysiiskuna malaha magacyo ama waxkale, sidaas darteed qof walba wuu imanayaa oo kutuurayaa.'*

### Muuqaalka 4: Luuq halaysan oo caagag buuxdaafay lagu arkayo xaafadaha Moss Side



Waxay kaqaybqaatayaasha sidoo kale noo sheegeen inaan la wargelin marka sharciyada celin-wareejinta iyo qashin qaadidda la bedelayo, taasoo adkeyneysa in la raaco nidaamka. Inkastoo carada noocan oo kale ah lagu sheegay cilmibaaris hore oo lagu qaaday Moss Side[13], in la raaco nidaamka waanay ku adakaaneysaa xitaa dadka cusub ee la nool bulshada, kuwaas oo inta badan yimaada iyagoo yaqaana afIngiriis yar aanna ku xirnayn dad taageera. Sida uu noo sheegay kaqaybgale, isagoo tixraacaya soo galootiga cusub:

> *'Waxay u baahanyihiin hanuunin. Wax adag majiraan, laakiin wax waliba way adag yihiin haddii aadan garanaynin sida loo maareeyo sida loola socdo. Laakiin haddii adiga ama qof kale oo fahamsan [mid] bulsho kale, markaa waad samayn kartaa hanuunin. Waxaad samayn kartaa xayeeysiin aad wax barto hadaad sidan samayso, sidan baa dhici, hadaad sidan sameyso sidan baa dhici.'*

Kaqaybgale kale ayaa ka hadlay baahida loo qabo in bulshaba ay bulshada kale wax ka barato, isagoo leh:

> *'Waa wax wanaagsan haddii ay beeluhu ay wada shaqeyn karaan [...] dadka, waxay isugu soo ururi karaan xarumaha beesha, waad ogtahay, [...] waxay isugu iman karaan xarunta bulshada oo ay halkaas ku qaban karaan xaflado. Sababtoo ah dadku, haddii aad u sheegto arrintaan inay saameynayso caafimaadkaada, caruurtaada, way imaanayaan, waad ogtahay, aadna wadaagtaan khibrada ku saabsan tan iyo taa...'*

Qaybta talooyinka, waxaan soo bandhignay talooyin taabagal ah ee wax kaqabashada baahida loo qabo in la helo hagid iyo taageero dheeraad ah.

## Muuqaalka 5: Luuq ay nadiifiyeen ayna ciid rogeen ama diyaariyeen deganayaasha



# MUNAAQASHOOYIN

Macluumaadka aan soo uruurinay ayaa noo ogolaanaya in aan samayno dhowr sheegasho. Sheegashooyinkani ayaa muhiim u ah in labidhaamiyo gaabinta fahamka sii wadida joogtaynta ee ay noo sheegtay aragtida reer galbeedka oo keliya iyo baahida loo qabo in laga barto Soomaalida iyo kuwa kale ee soo galootiga kayimi Koonfurta Aduunka ee ku nool magaalooyinka Ingiriiska. Waxa kale oo ay tilmaamaysaa talooyin dhowr ah oo aan isleenahay waa ay ka faaidaysan karaan dadka aqoonta kooban u leh dhaqanka Soomaalida iyo kuwa kale ee aan lahayn dhaqanka reer galbeedka, gaar ahaan kuwa ku jira maamulka/haya adeegga iyo kuwa u adeegga ururrada bulshada.

Inkasta oo ayan kaqeybgalayaasha isticmaalin ereyga 'joogtaynta', waxaa cad in mabaadiideeda muhiimka ah ay ku jirto doorashooyinkooda ee maalin walba.  Jawaabta soo noqnoqotay ee la bixiyay, 'waa wax aan mar walba sameeyay', ayaa ah caddaynta sii wadidda dhowr arimood oo muhiim u ah bay'ada, oo ay ku jiraan ilaalinta biyaha iyo yaraynta qashinka cuntada. Walaacooda bay'ada ayaa ah mid ka horeysay imaanshahooda ingiriiska waxayna dhiirigelinaysaa dhaqankooda qoyseed.

Kasokow lacag kaydinta, diinta iyo cilaaqaadka ayaa ah sababaha ugu muhiimsan ee kaqaybgalayaashu ay ugu noolyihiin siyaabaha loo tixgelin karo inay tahay joogtayn. Diinta Islaamka ayaa waxay ahmiyad wayn siineysaa daryeelka bay'ada, waxayna u muuqataa inay katarjumayso fakarka adag ee ay kaqaybgalayaasha noo sheegeen ee daryeelka dadka kale, haddii ay noqdaan xubnaha qoyskooda iyo deriska ama kuwa masaakiinta ah ee aanay aqoon u lahaynba. Rumaynta in khayraadka si taxadar leh loo isticmaalo, oo intooda badan kaqeybgalayaashu ay ucelinayaan diinta islaamka, waxay sidoo kale dhiirigelinaysaa rabitaankooda ah inay kaqaybgalayaasha khasaarin biyaha, tamarta, iyo cuntada.

Ragga iyo dumarka ka qayb qaatay cilmi baaristan ayaa isku raacay in haweenku ay kaalin muhiim ah ka cayaaraan maareynta kheyraadka qoyska waxayna kawada hadleen sidii ay masuuliyadda hogaanka qoyska loogu gudbin lahaa gabdhahooda. Tani waxay ka dhigantahay in ay muhiimad gaar ah leedahay in lala xiriiro haweenka iyo gabdhaha Soomaaliyeed arinta la xiriirta wadahadalka dadweynaha ee ku saabsan joogitaynta bay'ada.

Sida ay ka qaybgalayaasha oga fakaraan ayna u qoondeeyaan masuuliyad ayaa waxaa saameeynaya xiriirka ay la leeyihiin dowladda hoose. Dad badan ayaa sheegay inay yarayd rajada Soomaaliya laga qabay inay bixiso adeegyada lagu qaadayo qashinka guryaha. Halkan Manchester, kaqaybgalayaashu waxay diyaar u yihiin oo doonayaan inay ilaaliyaan bay'adooda maxaliga ah, laakiin waxay filayaan in dowladda hoose ay isugu yimaadaan meel dhexe.  Marka ay u muuqato in dowladda hoose ayan sameynayn, sida marka caagagga qashinka aan la faaruqin, waxay dareemayaan caro - sida dad badan oo kale oo muwaadiniin ah. Caradoodaas waxay ka imaneysaa iyagoo bixiya canshuurta adeegyada aana si kufilana loo fulin. Tani waxay tilmaamaysaa baahida loo qabo wada xiriir wanaagsan, sida lawada ogsoonyahay tayada bay'ada magaalooyinka ayaa waxa ay ku xirantahay inay jiraan 'xiriir iskaalmaysi oo labada dhinac ah oo kadhexeeya shacabka iyo adeegga [maxalliga]'[14].

Sababaha ay kaqaybgalayaasha bixiyeen inaysan ka qaybqaadan qoysas kudhaqma danaynta bay'ada ayaa waxay tahay kuwo bulsho iyo kuwo xayiraad ee ma aha doorashada shakhsi ahaaneed ama guuldarooyinka, sida aqoon la'aanta ama walwal. Hadii si fudud loo dhigo, meeshu waa muhiim.  Hadaynu eegno Moss Side oo ah meel magac xun loo yeelay ayaa kaalin wayn ku leh sida ay kaqaybgalayaasha u qiimeeyaan bay'ada[15].  Tusaale ahaan, qaar ka mid ah kaqeybgalayaasha waxay tilmaameen in xaafadaha deriska ah ay yihiin kuwo nadiif ah isla markaana ay leeyihiin dukaamo laga adeegto, beeraha lagu nasto, iyo adeegyada kale marka la barbar dhigo Moss Side. Xitaa Moss Side gudaheeda kaqeybgalayaashu waxay muujiyeen farqiga u dhexeeya qoysaska leh caagagooda qashinka ee gaarka ah (oo loo arko kuwo door leh) iyo qoysaska isticmaala caagagga qashinka ee wadaagga ah. Farqigan udhaxeeya adeeg bixinta ayaa qaabeynaya ilaa xadka ay dadka deggani awood u leeyihiin in ay qabtaan qoysas kudhaqma danaynta bay'ada. Baaritaankani wuxuu la socdaa cilmibaarista hadda jirta ee sheegaysa xiriirka u dhexeeya sinnaan la'aanta bulshada iyo tayada deegaanka ee xun[16].

# TALO JEEDIN

Talooyinkayaga waxaa loo sameeyey si looga jawaabo natiijooyinka warbixinta iyo jawaabcelinta laga helay shirka bulshada. Waxaa la siiyaa aqoonsi ah inay u baahan yihiin ka go'naanta iyo kheyraadka ka yimaada kuwo kala duduwan ee daneeyayaasha maxalliga ah. Qaarkood way sahlanaan doonaan fulintooda marka loo eego kuwa kale.

## Su'aalidda Malaynta

Cilmi baaristayadu ayaa ogaatay in qaar badan oo ka mid ah qiyamka iyo dhaqanka ay soo sheegaan dadka Soomaalida ee deegaanka Moss Side ay la socdaan fakarka joogtaynta bay'ada. Sidaa darteed waxay taageeraysaa inay ka hortagto fakarka ah in joogtaynta ay tahay fakar u gooni ah reer galbeedka oo 'waxcusub' ku ah dadka ka yimi Koonfurta Caalamka. Malaynta noocan oo kale ah waxay ku salaysantahay aqoon la'aan ayna tahay in lasaxo. Sidaa darteed waxaan soo jeedinaynaa:

- Ha u malayn in dadka Soomaalida ah iskamaqanyihiin ama ubaahanyihiin in labaro arrimaha bay'ada .
- Waa in cilmibaaris dheeraad ah lala sameeyo dadka asal ahaan aan ahayn reergalbeed iyo diimahaba si loo ballaariyo fikradda joogtaynta loona dhaafsiiyo meel kabaxsan edagga reer galbeedka.
- Cilmibaarista waa inay fiiro gaar ah u yeelato caqabadaha bulsho iyo dhismeed ee is hortaagi kara sii wadista dhaqanka daryeelka bay'ada ee deegaanka cusub ee soo-galootiga.

## Boorinta kudaridda

Haddii caqabadaha ay abuurtay aqoon la'aanta iyo malaha khaldan laga gudbo, way fududahay in lagu daro ajandaha joogtaynta dad badan oo kala duduwan. Si loo kordhiyo suurtagalnimada ay dadka Soomaalida ahi si firfircoon uga qayb qaadan karaan, waxaan ku talinaynaa:

- Hubi in luuqadda loo adeegsado ololaha bay'ada la fahmi karo lagana ilaaliyo erayo dhaqameedka xasaasiga (sida 'joogtaynta').
- Hubso in dadka cusub ay heli karaan macluumaad aasaasi ah oo ku saabsan siday oga qaybgali lahaayeen barnaamijyada bay'ada ee maxalliga ah (celin wareejinta iyo qashin-qaadidda) oo luqaddooda lagu siiyo.
- In la magacaabo safiiro bay'adeed ee bulshada Soomaalida si ay u matalaan walaaca bulshada shirarka dadweynaha ee arrimaha bay'ada.
- Hadday suurtagal tahay ooy haboontahay, ixtiraam qiimaha dhaqanka adigoo qabanaya shir u khaas ah haweenka keliya ama ragga kaliya.
- Aqoonsiga doorka diin aaminka iyo kaalinta qoyska (gaar ahaan doorka haweenka iyo gabdhaha) ee qaabeyneysa hababka nolol maalmeedka ee qoysaska Soomaalida ah.

## Sameynta goobo iyo meelo loogu talagalay hawlgelinta maxalliga

Fikradda ah in kooxo gaar ah, sida soogalootiga Soomaalida, ay adag tahay in la gaaro 'ama' adag tahay in lala xiriiro' waa in dib loo eego. In kastoo ay xaqiiq tahay in ay jiraan sababo dhaqameed iyo luqadood ah oo u dhexeeya dadka Soomaalida ah iyo adeeg bixiyayaasha kale ee aan Soomaalida ahayn, shaqaalaha dowladda hoose iyo deriska, waxaa suurto gal ah in laga gudbo caqabadahaas iyadoo loo tagayo, lana samaynayo goobo iyo meelo laisku arko . Si tan loo sameeyo, waxaan ku talinaynaa:

## TALO JEEDIN

- In si joogto ah loo qabto kulamo dadweyne oo loogu talagalay dadka cusub si ay u bartaan una muujiyaan walaacooda ku saabsan tayada bay'ada maxalliga ah. Hubi inay yihiin kuwo daboolaya soona dhowaynaya jinsiga iyo luqadda loo dhanyahay, dhaqan ahaanna sax ah. Qabo kulammo dhowr ah oo loogu talagalay dumarka adoo adeegsanaya turjubaano ku hadla luqadaha ay dadka kasoo qaybgalay ku hadlaan.
- Isku dubbarid kulamo kala duwan oo ku saabsan wadaagga waayo aragnimada waxqabadka ee arrimaha joogtaynta.
- Ku dhiirrigeli masaajidada, kaniisadaha iyo kooxaha kale ee diimeed in ay kaalin ka qaataan sidii dadka laisugu keeni lahaa ayna u wadaagi lahaayeen fikradooda joogtaynta uguna dhaqmi lahaayeen.
- Sameeya goobaha cagaaran: abuura beero beeleed iyo luuqyo cagaar ah oo dhiirigelin kara wada shaqayn ficileed iyo mashaariic ay wadaagaan deriska ka soo jeeda meelo kaladuduwan.

## FAALADA GABAGABAYNTA

Dadka ka soo guuray waddamada sida Soomaaliya oo ay la soo gudboonaatay xaalado dhaqan dhaqaale oo adag, kuwo siyaasadeed iyo mid bay'adeed (oo ay ugu wacantahay gumeysigii, dagaalo iyo isbeddelka cimilada) una soo guuray meelo dhaqaala leh oo adduunka ka mid ah ayaa ku jira xaalad gaar ah. Midda hore waxay ku noolaayeen khibrad ah xoolo yaraan waxayna garanayaan sida loola qabsado noloshaas ayna u badbaadaan. Dhanka kale, qaab nololeedkooda waxyar ayey ku soo kordhisay wadayaasha isbedelka bay'ada iyo cimilada. Hadana weli siyaasadaha ku baaqaya isbeddelada habdhaqanka isticmaalka ee wadamada hodanka ah sida Ingiriiska makala saarayaan dadkaan gooniga ah iyo guud ahaan dadka ku dhashay Ingiriiska. Taas macnaheedu waa in farriimaha istiratijiyada ay badanaa ka maqnaan karaan fakarka, iyo aqoonta qiimaha badan iyo waayo-aragnimada soogalootiga ayaa la iska indhatiri karaa. Daraasaddeena waxay ka jawaabaysaa xaaladdan oo waxay ujeeddadeedu tahay inay gacan ka gaysato horumarinta qaab loo dhanyahay marka loo eego kan hadda ka jira Manchester iyo magaalooyin kale oo raadinaya hamiga wayn ee ajande cagaaran.

In kastoo daraasadani ay ka soo baxday natiijooyin xiiso leh iyo aragtiyo laga helay dadka deggan Moss Side, haddana suurto gal ma aha in la sameeyo hadal guud oo ku saabsan walaaca iyo dhaqanka soogalootiga Soomaaliyeed. Waxaan awoodnay inaan la hadalno tiro aad u yar oo daganayaal ah todobaadyo kooban dabayaaqadii xagaaga ee 2018. Tijaabadaas looma qorsheynin, mana ahan, inay matasho dhamaan dadka Soomaalida ah ee deggan Moss Side (ama ingiriiska). Shaki kuma jiro farqiga u dhexeeya aragtida, waxqabadka iyo dareenka soogalootiga Soomaaliyeed ee aan awoodin inaanu wax ka baranno, sidaa darteed raadraaca kaladuwanaanshaha waqti ka dib waxay ujeedo qiimo leh u tahay cilmi baarista mustaqbalka.

Natiijooyinka muhiimka ah oo ka soo baxay daraasaddan ayaa ah in cilaaqaad lagu aasaasay iskaashi, kaas oo aan rajaynayno inuu u noqon doono assaasi shaqooyinka mustaqbalka. Saddexda cilmibaarayaal ee Ingiriis-Yurub (oo laba ka mid ah muhaajiriin ku ah Ingiriiska) ma aysan samayn karin mashruucan iyagoon si dhow ula shaqeynin labadeenna asal ahaan kasoo jeeda Soomaalida ee Salah iyo Safia. Ugu danbayntii waxaan ku talin lahayn in lasameeyo cilmi baaris dheeri ah loona sameeyo qaabkan iskaashiga iyo bulshada ku saleysan.

## MAALGELINTA

Kooxda cilmi baarayaasha waxay dhaqaale ka heleen Jaamacadda Manchester si ay u fuliyaan mashruucan. Waxaan ka helnay £ 5,250 macadka Sustainable Consumption Institute si loo soo uruuriyo xogta, iyo deeq yar oo ah £ 2000 oo laga bixiyo School of Social Sciences si loo maalgeliyo dhacdooyinka jawaab celinta bulshada iyo soo saarista warbixintan.

## MAHADNAQ

Waxaa mahad leh Carol Packham, Anne Tucker, Somali Adult Social Care Agency, Dugsiga Hoose ee Claremont Primary School (Maamulaha Anne Conboy iyo Mr. M. Affi), Masjidka Al Furqan, Councillor Mahadi Sharif Mahamed iyo Cohesion Legal Services.

## FIIRO GAAR AH

[1]Bullen, E. 2015. *Manchester Migration Report*. Manchester City Council: Greater Manchester. Online: http://www.manchester.gov.uk/downloads/download/4220/public_intelligence_population_publications

[2]Office for National Statistics (ONS), 2011. *UK census data*. Online: http://www.ukcensusdata.com/

[3]Shankley, W. 2017. *Report on the distribution of BME populations in Greater Manchester. Centre of Dynamics of Ethnicity, University of Manchester.* Online: https://aiutrust.files.wordpress.com/2017/09/report-on-the-distribution-of-bme-populations-in-greater-manchester-final.pdf

[4]Child Poverty Action Group. 2019. *Poverty in Your Area.* Online: http://www.endchildpoverty.org.uk/poverty-in-your-area-2019/

[5]Shaqsiyan la xiriiray sarkaalka Dowladda Hoose ee Manchester u qaabilsan xaafaddaha ee Moss Side, Janaayo 2019.

[6]MacGregor, S. & Pardoe, S. 2018. *Talking Rubbish in Moss Side: Exploring the problem of litter in the streets and alley of a deprived neighbourhood with a large student population.* Online: https://www.uppingit.org.uk/pdf/Talking-Rubbish-in-MossSide-12-04-18-Report-Print.pdf

[7]Somali Adult Social Care Agency (SASCA). 2014. *Hope for the Future: Somali Community Voices its Concerns and Ideas*. Community Audit and Education Centre, Manchester Metropolitan University. Online: http://www.ioe.mmu.ac.uk/caec/reports/SASCA%20research%20report%2021814.pdf

[8]Change Institute, 2009. *The Somali Muslim Community in England.* Department for Communities and Local Government: London.

[9]Fakarkan ayaa sidoo kale lagu muujiyey waraysi xog ogaal ah oo uu la yeeshay cilmibaare asal ahaan ka soo jeeda Soomaaliya ayadoon la shaacinayn uu layeeshay siyaasi islamarkaana ah siyaasaddejiye iyo xildhibaan, Agoosto 2018.

[10]Dadka Soomaalida dhexdooda waxaa jira dad ku hadla Baraawa, iyo sidoo kale Afsoomaali, oo ah luqadda ugu badan. Dhammaan kaqeybgaleyaasha ma'ayan awoodin inay akhriyaan qoraalka Soomaaliga, gaar ahaan haweenka. Xaaladahaas, Salah ama Safia ayaa u akhriyay su'aalaha baaritaanka waxayna qoreen jawaabaha iyagoo matalaya kaqeybgalayaasha.

[11]Garaafkan wuxuu soo bandhigayaa boqolkiiba tirada kaqaybgaleyaasha ka jawaabey inay 'markasta' ama 'badanaa' biyo kaydiyaan mid kasta oo ka mid ah sababaha daraasadda ku qoran. Boqolkiiba kuma dari doonaan 100 maaddaama kaqeybgalayaasha ay dooran karaan wax kabadan hal xulasho.

[12]Graafkan wuxuu soo bandhigayaa boqolkiiba kaqeybgaleyaasha ka jawaabey 'dhif' ama 'weligood' cunto ma beeran sababaha ku qoran daraasadda. Boqolkiiba kuma dari doonaan 100 maaddaama kaqaybgalayaashu ay dooran karaan wax kabadan hal xulasho.

[13]Arag MacGregor & Pardoe, 2018.

[14]Bramley, G., Bailey, N., Hastings, A., Watkins, D. Crowdace, R., 2012. Environmental justice in the city? Challenges for policy and resource allocation in keeping the streets clean. *Environment and Planning A: Economy and Space* 44(3), 741-761.

[15]Brown, L., Cunningham, N., 2016. The Inner geographies of a migrant gateway: mapping the built environment and the dynamics of Caribbean mobility in Manchester, 1951-2011. *Social Science History* 40(1), 93-120.

[16]Tusaale ahaan, arag Bramley, G., Bailey, N., Hastings, A., Watkins, D. Crowdace, R., 2012. Environmental justice in the city? Challenges for policy and resource allocation in keeping the streets clean. *Environment and Planning A: Economy and Space* 44(3), 741- 761; Bullard, R. D. (2000). *Dumping in Dixie: Race, Class, and Environmental Quality*. Westview Press, Boulder, CO; Hastings, A., 2009. Poor neighbourhoods and poor services: evidence on the 'rationing' of environmental service provision to deprived neighbourhoods. *Urban Studies* 46(13), 2907–292; Holifield, R., Porter, M., Walker, G. (Eds.), 2010. *Spaces of Environmental Justice.* Wiley-Blackwell: Oxford.